**FAAFINTA RASMIGA**

الجريدة الرسمية

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

لولاية أرض بونت الصومال

***Sanadka 7-aad Garowe 15 September 2005*** ***lam 9***

***Faafinta bilwalba soo baxda*** جريدة الشهرية

***Qaybta faafinta rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland***

*Qiimuhu waa Sh/So. 10,000 Lambar walba.* ***Rukunka Sanadkii*** *waa Sh/So. 170,000 dalka gudihiisa, dibadda Sh/So. 500,000* ***Rukunka*** *la weydiisto wakhtiga loo gooyay wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yay waa Sh/So. 3,000* ***Rukunka*** *iyo qoritaanka waxaa la weydiistaa qaybta maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maaliyadda.*

# TUSMADA

**Qaybta Kowaad**

**Sharci**

**Qaybta Labaad**

**Xeer**

**Waxba Ma Leh**

**Qaybta Sadexaad**

Talooyin, isgaarsiin, ogaysiis, iidheh, IWM

**Waxba Ma leh**

- Sharci Lr – 4, 8/09/05 kuna saabsan habaynta nidaamka xukuumada iyo hay'addah laxiriira.

**Bogga 117-126**

**DAWLAD G. PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**
**Xafiiska K/simaha Madaxweynaha**

**PUNTLAND STATE**
**OF SOMALIA**
**Office of the Vice President**

Sharci Lr. 4. ee 10/09/2005, kuna saabsan nidaamka Xukuumada iyo Hay'adaha la xiriira.

**K/simaha Madaxweynuhu**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY | Dastuurka Dawlad Goboleedka Puntland ee Soomaaliya. |
| MARKUU ARKAY | Muhiimada sharcigani u leeyahay nidaamka xukuumada iyo Hay'adaha la xiriira. |
| MARKUU ARKAY | Ansixinta Golaha wakiillada Puntland ee XGGW /DGPL/ 139/2005, ee 01/08/2005. |
| DHEGAYSTAYNA | Golaha xukuumada. |

WUXUU SOO SAARAY

Sharciga soo socda

**Qodobka Kowaad**

Waxaa Golaha wakiillada Puntland ansixiyeen sharciga nidaamka xukuumada iyo Hay'adaha la xiriira.

**Qodobka Labaad**

Nuqulada asalka ah waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, kan Garyaqaanka guud iyo kan Xoghayaha Gollaha Wakiillada..

**Qodobka Saddexaad**

Sharcigani waxa uu dhaqangelayaa marka K/simaha Madaxweynuhu saxiiso, laguna soo saaro faafinta Rasmiga ah ee Puntland, markaa ayaa sharciga kamid noqonayaa shuruucda Dawladda qof kastana ay waajib ku noqonaysaa inuu dhawro, kuna dhaqmo.

Xasan Daahir Maxamuud
Madaxweyne-kuxigeenka
ahna Siihayaha xilka Madaxweynaha

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

PUNTLAND STATE
OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Sharci Lam.

Kuna saabsan habaynta Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'adaha la xiriirsan

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland

**Markuu arkay:** Go'aanka Golaha Xukuumadda

**Markuu tixgeliyey:** Baahida loo qabo nidaam lagu dhaqo mamulka guud ee Xukuumadda,si loogu yeelo asaas adag oo lagu horumarin Kro laguna gaari karo himilooyinka iyo danaha guud ee ay ummadda Puntland higsaneyso.

**Wuxuu soo saarayaa**

**·Sharciga soo socda:**

Qodobka 1aad
(Nidaamka Xukuumadda)

**Qodaobka 1aad Xukuumadda**

Xukuumaddu waxay ka koobantahay Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka,Wasiirro,Wasiirro-dowlayaal iyo Wasiirro-xigeenno
Shirka xubnaha Xukuumaddu ay yeeshaan waxaa lagu magacaabaa Golaha Xukuumadda

E-mail plspresidency@hotmail.com ☎00252-54-47374 Fax 00252-54-54086 

Golaha Xukuumaddu waa hay'adda ugu sarraysa fulinta maamulka dowladda.
Guddoomiyaha golaha xukuumadda waxaa noqonaya Madaxweynaha.
Xoghayaha golaha Xukuumadda waxaa ah Agaasimha Guud ee Madaxtooyada

**Qodobka 2aad Madaxweynaha Dowladda**

Madaxweynuhu wuxuu hoggaamiyaa, mas'uulna ka yahay siyaasadda guud ee Dowladda ilaalinta,midaynta, xiriirinta iyo kor u qaadista waxqabadka xubnaha xukuumadda,
Isugu yeerista iyo hoggaaminta kulamada Golaha Xukuumadda iyo diyaarinta ajendaha
Madaxweynuhu waa Guddoomiyaha Golaha Xukuumadda
Madaxweynahu wuxuu saxiixa shuruucda Golaha Wakiiladu ansixiyaan, go'aannada iyo qoraallada rasmiga ah ee ka soo baxa Golaha xukuumadda.
Hoggaaminta hawlaha la xiriira difaaca iyo nabadgelyada.
Inuu qaado tallaabo kasta ee Dastuurka waafaqsan oo lagu ilaalinayo danaha guud ee ummadda ama lagama maarmaan u noqota habsami u socodsiinta maamulka iyo fulinta barnaamijka dowladda.

**Qodobka 3aad Madaxweyne Ku-xigeenka Dowladda**

1. Sii wadidda dhammaan xilalka M/weyanaha markii uu dalka ka maqan yahay, ama uusan si kumeelgaar ah xilka u gudan karin.
2. Kala-talinta Madaxweynaha xulashada wasiirada iyo shaqo-ka-fariisintooda.
3. Fulinta hawlaha M/weynahu u wakiisho oo aan ka baxsanayn xilalka iyo waajibaadka Madaxweynaha.
4. Haddii uu Madaxweynuhu geeriyoodo, xilka laga qaado ama uu iscasilo, xilkiisu waxa uu ku wareegayaa Madaxweyne Ku-xigeenka muddada inta ka hartay.
5. Haddii xaaladda ku xusan Qodobkan Faqradiisa 4aad dhacdo, Golaha Wakiilladu waxa uu soo dooranayaa ku-xigeen 30 maalmood gudahood.

**Qodobka 4aad Golaha Xukuumadda**

Golaha Xukuumaddu waxay hawlaha u qabanayaan wadar iyo mid midba
Waxay go'aaminayaan arrimaha siyaasadda ee muhiinka ah iyo hawlaha kale ee ku qeexan Dasruurka Dowladda Puntland.
Magacaabidda madaxda sare ee wasaaradaha iyo hay'adaha madaxa-bannaan iyo shaqo ka saariddooda,iyadoo la waafajinayo dastuurka.
Diyaarinta qoraallada iyo shuruucda loo gudbinayo Golaha Wakiilada.

Diyaarinta miisaaniyadda Dowladda.
Xisaab-xiridda miisaaniyadda Dowladda 30-ka June sanad kasta.

**Qodobka 5aad Wasaaradaha**
Wasaaradaha Xukuumadda Dowladda Puntland waa kuwa hoos ku tilmaaman:
Wasaaradda Arrimaha Diinta iyo Awqaafta
Wasaaradda Arrimaha Gudaha,Amniga iyo DDR
Wsaaradda maaliyadda
Wsaaradda D/ha Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga
Wsaaradda Qorshaynta iyo Is-kaashiga Caalamiga ah
Wasaaradda Hawlaha Guud,Gaadiidka iyo Duulista Hawada
Wsaaradda Kalluumaysiga,Dekedaha iyo gaadiidka Badda
WasaaraddaXanaanada Xoolaha,Beeraha iyo Daaqa
Wsaaradda Caafimaadka
Wasaaradda Waxbarashada
Wasaaradda Horumarinta Haweenka iyo Arrimaha Qoyska
Wasaaradda Shaqada,Shaqaalaha,Dhalinyarada iyo Isboortiga
Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha
Wasaaradda Warfaafinta,Dhaqanka,Is-gaarsiinta iyo Dalxiiska

Xilalka iyo hawlaha ay wasaaradaduhu kala leeyihiin waxaa qeexaya qodobbada soo socda:

**Qodobka 6aad Wasaaradda Arrimaha Diinta iyo Aw-qaafta**
**Jaangooyada** iyo qorshaynta siyaasadda iyo maamulka wasaaradda
**Ilaalinta** iyo ku-dhaqanka shareecada Islaamka
**Dhiirri-gelinta** iyo fidinta Diinta Islaamka
**Diyaarinta** culimo aqoon dheer u leh Diinta Islaamka iyo wacyi-gelinta
**Tiro-koobka** iyo daryeelka masaajiddada,awqaafta iyo dugsiyada Qur'aanka
Xal u helidda dhibaatada ka iman karta khilaafaadka aragtiyada Diiniga ah ee kala duwan
Hubinta in sekada loo bixiyo si waafaqsan Shareecada Islaamka
Nidaaminta xeerarka ka hor-tagga anshax-xumida bulshada
Kormeerka iyo maamulka xabsiyada
Diiwaan-gelinta iyo ka markhaati kaca heshiisyada la-haanshaha gaar ahaaneed
Ka qayb galka shirarka caalamiga ah ee Xajka iyo kulamada Dowladaha iyo hay'adaha Islaamka

**Qodobka 7aad Wasaaradda Arrimaha Gudaha,Amniga iyo DDR**
Sugidda amniga iyo nabad-gelyada dalka Puntland gudihiisa iyo ka qayb qaadashada daafaca dalka
Soo jeedinta magacaabidda madaxda sare ee gobollada
Soo jeedinta qaab-dhismeedka Booliska Dowladda Puntland
Soo jeedinta xaalad amni oo deg-deg ah
Soo jeedinta qeexidda xuduudaha gobollada iyo degmooyinka Dowladda Puntland
Hub ka dhigidda dadweynaha hubaysan sida maleeshiyada
Abuuritaan xarumo dhaqan celin
Daryeelka dadka soo barakacay iyo saboolka
Ka saaridda dalka miinooyinka

**Qodobka 8aad Wasaaradda Maaliyadda**
Wasaaraddu waxay fulisaa siyaasadda Dowladda ee ku wajahan dhaqaalaha dalka,waxayna u xil saaran tahay:
Diyaarinta miisaaniyadda Dowladda
Jaangooyada maaliyadeed ee dalka,dakhliga Dowladda iyo kharajkaba
Diyaarinta iyo maamulka cashuuraha
Maamulka ciidanka ilaalinta cashuuraha iyo la-dagaallanka cashuur-dhaafka iyo la dhuumashada cashuuraha
Dejinta siyaasad miisaaniyadeed oo ballan qaadaysa horumarinta dhinacyada kala duwan ee nolosha dadeynaha
Ka qayb galka shirarka iyo heshiisyada dowliga ah ee ku saabsan maaliyadda
Abuuritaanka ilaha dhaqaale ee dalka
Xisaab-xirka miisaaniyadda,xisaab-celinta kharajyada dowladda,la dagaallanka xatooyada iyo musuqa maaliyadeed
Ka warbixinta iyo talo ka soo jeedinta xaaladda dhaqaale ee dalka
Maaraynta is-dhinka miisaaniyadda Dowladda
Abuuritaan iyo adeegsiga khubaro dhaqaale iyo maaliyadeed
Dhiirri-gelinta dhimista kharajyada Dowladda
Guddoonka mucaawinooyinka dibadda iyo gudaha dalka
La xiriirka hay'adaha lacagaha
Habaynta shuruucda bangiyada
Nidaaminta iyo ilaalinta shuruucda maaliyadeed

**Qodobka 9aad Wasaaradda D/ha Hoose iyo Horumarinta Reer Miyiga**
Fulinta siyaasadda Dowladda ee ku wajahan horumarinta degmooyinka
Dhismaha golayaasha degaanka ee degmooyinka
Fulinta mashaariicda horumarinta bulshada,sida caafimaadka iyo waxbarashada

Fulinta mashaariicda la xiriira magaaleynta
Fulinta mashaariicda horumarinta dhaqaale iyo kaabayaasha la xiriira
Horumarinta iyo gaarsiinta miyiga iyo degaamada fog-fog ama go'doonka ah adeegyada laga ma maarmaanka ah
Xoojinta dhismo-awoodeedka maamulada degmooyinka
U gurmadka degmooyinka iyo goobaha ay masiibooyinku ka dhacaan,sida abaaraha,duufaanada,daadadka,cudurrada faafa iwm

**Qodobka 10aad Wasaaradda Qorshaynta iyo Is-kaashiga Caalamiga ah**
Fulinta arrimaha siyaasadda dibadda heer Dowladda Puntland
Xiriirka Dowladda iyo hay'adaha caalamiga ah
La gelidda heshiisyo hay'adaha iyo ururrada caalamiga ah
Diyaarinta qorshaha marxaladaysan ee dalka
Xallinta wixii dhibaato ama khilaafyo oo la xiriira hawlaha hay'adaha iyo ururrada caalamiga ah
Xiriirinta jaaliyadaha dibadda ee Puntland
Baadi-goobka danaha ay Puntland ka leedahay dalalka shisheeye,deeq-bixiyayaasha iyo hay'adaha caalamiga ah kuna saabsan mashaariicda iyo barnaamijyada horumarinta
Diiwaan-gelinta ururrada sama-falka waddaniga ah ee Puntland

**Qodobka 11aad Wasaaradda Hawlaha Guud,Gaadiidka iyo Duulista Hawada**
Fulinta siyaasadda Dowladda ee ku aaddan hawlaha guud
Dejinta qorshaha ku saabsan dayactirka,horumarinta iyo maamulka kaabayaasha gaadiidka ee jidadka iyo gegooyinka dayaaradaha
Ka hawl-galka cilmi-baarista iyo hawl-gelinta goobaha tijaabada tayada dhismaha
Dejinta xeerarka dhismaha,shuruudaha iyo tilmaamooyinka farsamo ee la xiriira dhismaha,iyadoo la waafajinayo duruufaha iyo cimilada degaamada Puntland
Dayactirka dhismayaasha Dowladda
Dejinta iyo fulinta barnaamijyada iyo mashaariicda la xiriirta tamarta
Dejinta iyo fulinta barnaamijyada iyo mashaariicda la xiriirta biyaha
Horumarinta iyo maaraynta duulista hawada ee rayadka ah

**Qodobka 12aad Wasaaradda Kalluumaysiga,Dekedaha iyo Gaadiidka Badda**
Dayactirka,horumarinta iyo maamulka dekedaha iyo adeegyada la xiriira
Dhowrista nidaamka dekedaha iyo badmaaxyada
Ururinta khidmadaha dekedaha
Tayeynta hawlaha iyo adeegga dekedaha iyo kor-u-qaadidda sumcadda dekedaha

Habaynta iyo diiwaan-gelinta tiro-koobka waxa ka dhoofa iyo badeecadaha ka soo dega dekedaha Puntland
Dhiirri-gelinta iyo tayeynta wax-soo-saarka khayraadka badda
Horumarinta xeebaha,Ilaalinta bii'adda badda iyo xeebaha
Ka hor-tagga xaalufinta badda
Dhowrista xilliyada kalluumaysiga
Nidaaminta iyo diiwaan gelinta iskaashatooyinka kalluumaysatada
Kor u qaadidda farsamooyinka la xiriira kalluumaysiga
Diyaarinta iyo ilaalinta heshiisyada shirkadaha kalluumaysiga
Ilaalinta xeebaha iyo xuduudaha badeed ee Puntland
Nidaaminta iyo la socodka dhaqdhaqaaqa gaadiidka badda ee adeegsada dekedaha iyo badda Puntland

**Qodobka 13aad Wasaaradda Xanaanada Xoolaha,Beeraha iyo Daaqa**
Fulinta siyaasadda Dowladda ee ku wajahan xanaanada xoolaha,beeraha iyo daaqa
Daaweynta xoolaha iyo ka hor-tagga cudurrada faafa
Ilaalinta bii'adda iyo ka hor-tagga nabaad-guurka
Daryeelka duur-joogta Kala habaynta dhul-beereedka iyo dhul-daaqsimeedka
Ilaalinta iyo hubinta tayada daawooyinka xoolaha iyo beeraha
Bixinta iyo diiwaan-gelinta ruqsadaha dhul-beereedka

**Qodobka 14aad Wasaaradda Caafimaadka**
Fulinta siyaasadda Dowladda ee ku wajahan caafimaadka
Ku baahinta gobollada iyo degmooyinka daryeelka caafimaadka iyo kaabayaashiisa
Ka hor-tagga cudurrada faafa
Hubinta nadaafadda iyo tayada biyaha la cabbo
Bixinta ruqsadaha farmashiyayaasha iyo rugaha caafimaadka ee gaarka ah
Hubinta tayada daawooyinka iyo qalabka caafimaadka ee dalka la keeno
Baahinta wacyi-gelinta la xiriirta caafimaadka
Soo saaridda shaqaale u tababaran xirfadaha la xiriira caafimaadka

**Qodobka 15aad Wasaaradda Waxbarashada**
Fulinta siyaasadda Dowladda ee ku wajahan waxbarashada
Dejinta manaahijta tacliinta oo waafaqsan Diinta Islaamka iyo dhaqanka reer Puntland
Ururinta,tiro-koobka iyo tababaridda macallimiinta
Dhiirri-gelinta waxsbarashada gaarka,iyadoo la hubinayo lana oggolaanayo manaahijtooda
Dhiirri-gelinta dugsiyada barashada Diinta Islaamka
Dayactirka,horumarinta iyo maamulka dugsiyada Dowladda

Ka hawl-galka abuuritaanka jaamacado
Abuuridda dugsiyada farsamada iyo xirfadaha
Baadi-goobka deeqo waxbarasho
Diyaarinta xeerka waxbarashada gaarka ah
Ka qayb galka shirarka cilmi-baarista adduunka

**Qodobka 16aad Wasaaradda Horumarinta Haweenka iyo Arrimaha Qoyska**
Ka hawlgalka fulinta siyaasadda Dowladda ee ku wjahan haweenka & arr.qoyska
Diyaarinta barnaamijyada lagu tababarayo haweenka.
Taakulaynta dhaqdhaqaaqyada iyo ururrada haweenka
Hirgelinta waxbarshada da'da waaweyn ee haweenka iyo la-dagallanka aqoon-darrida
Ka hawlgalka ka qayb-galka haweenka hawlaha siyaasadda,maamulka iyo barnaamijyada horumarinta dalka
Ka hawlgalka in gabdhaha da'-dugsiyeedku helaan furasadaha waxbarashada asaasiga ah
Diyaarinta iyo fulinta mashaariicda daryeelka caafimaadka hooyooyinka
Dejinta barnaamijyada wacyi-gelinta haweenka
Diyaarinta iyo meelmarinta barnaamijyo marxaladaysan oo ku aaddan arrimaha qoyska
Diyaarinta xeerar ballan qadaya sugidda xuquuda haweenka

**Qodobka 17aad Wasaaradda Shaqada,Shaqaalaha,Dhaliyarada iyo Isboortiga**
Shaqo-qorista shaqaalaha Dowladda iyo hay'adaha dalka Puntland
Dejinta xeerka shaqada iyo shaqaalaha
Ilaalinta xuquuqda shaqaalaha
Habaynta qaabka shaqaalaha Dowladda
Dejinta nidaamka qorista,dallacsiinta,shaqo ka saaridda,arrimaha hawl-gabnimada shaqaalaha iyo xaq-siinta kuwa shaqada ku waxyeelooba
Tababarka shaqaalaha
Kala beddelidda shaqaalaha Dowladda
Dejinta nidaamka qorista shaqaalaha gaarka ah
Horumarinta isboortiga Puntland
Abuuritaanka iyo dhiirri-gelinta naadiyo isboorti
Dayactirka iyo tayeynta xarumaha iyo kaabayaasha isboortiga
Ku fidinta isboortiga gobollada iyo degmooyinka
Qaban-qaabada tartamada isboorti ee gudaha iyo dibadda
Fulinta siyaasadda Dowladda ee ku wajahan dhaliyarada

**Qodobka 18aad Wasaaradda Ganacsiga iyo warshadaha**
Habsami u socodka ganacsiga dalka
Ilaalinta ganacsiga suuqa xorta ah

Xiriirka ganacsatada Puntland,qaybaha kale ee Soomaaliya iyo adduunweynaha
Dhiirri-gelinta waxsoosaarka warshadaha,wax dhoofinta iyo dhimista badeecadaha dibadda laga keeno oo la soo dejiyo
Abuuritaanka shaqaale u tababaran maamulka suuq-geynta iyo ganacsiga caalamiga ah
Abuuritaanka golaha kor u qaadista ganacsiga dibadda
Abaabulka,agaasinka iyo ka qayb galka carwooyinka dalka gudihiisa iyo dibaddiisa
Ka hawl-galka abuuritaanka rugo ganacsi
Ilalinta iyo sugidda tayada badeecadaha dibadda laga soo dejiyo iyo kuwa dalka gudihiisa laga soo saaro

**Qodobka 19aad Wasaaradda warfaafinta,dhaqanka,isgaarsiinta & dalxiiska**
Wacyi-gelinta bulshada
Diyaarinta iyo ku-dhaqanka xeerarka saxaafadda
Faafinta siyaasadda iyo barnaamijyada Dowladda
La socodka war-baahinta adduunka
Ka hawl-galka tayeynta war-baahinta waddaniga ah
Diyaarinta iyo fulinta xeerarka isgaarsiinta
Dhiirri-gelinta horumarinta qalabka iyo teknooloojiyada war-baahinta iyo isgaarsiinta
Ka-hawl-galka barnaamijyada la xiriira hiddaha iyo dhaqanka
Ururinta taariikhda Puntland
Ilaalinta iyo dayactirka dhimayaasha iyo goobaha taariikhiga ah
Dejinta barnaamijyo lagu horumarinayo dalxiiska iyo kaabayashiisa
Tababaridda iyo sare u qaadidda aqoonta xirfadeed ee hawl-wadeennada iyo shaqaalaha wasaaradda.

**Qodobka 20aad Hay'adaha Madaxa-Bannaan:**
Hay'adaha Madaxa-Bannaan ee Madaxtooyada hoos yimaadaa waa kuwa soo socda:

- Hay'adda Hanti-dhowrka Guud ee Dowladda
- Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda
- Hay'adda Arrimaha Beni'aadannimada iyo Maaraynta Masiibooyinka Dabiiciga ah (Humanitarian Affairs And Disaster Management Agency-HADMA).
- Hay'adda Nabad-sugidda Puntland

Xilalka iyo hawlaha hay'aduhu waa sidatan:
**Hay'adda Hanti-dhowrka Guud ee Dowladda**
Hanti-dhowrka Guud waa hay'ad Madax-Bannaan,waxay si toos ah warbixin u siin kartaa Xukuumadda iyo Golaha Wakiilada,waxay u xil saran tahay ilaalinta iyo dhowrista hantida Dowladda,waxay hubisaa oo xaqiijisaa hantida,maaliyadda iyo xisaabaadka Dowladda dhexe,Gobollada,Degmooyinka iwm.

Hubinta in dakhliga loo qabtay,loo xareeyey,loona dhowray si waafaqsan sharciga xisaabaadka iyo maaliyadda Dowladda.
In kharajku yahay mid ku salaysan miisaaniyadda la qoondeeyey oo waafaqsan hab xisaabaadka bixinta lacagta iyo nidaamka maamulka lacagta.

Dakhliga iyo kharajka oo ilaalintooda hanti-dhowrku u xil saran yahay wuxuu ku la xisaabtamayaa kuna ilaalinayaa cid kasta oo mas'uul ka ah ama gacanta ku haysa,wuxuu kaloo ku la xisaabtamayaa kuna dabagelayaa qof kasta oo lug ama raad kyu yeesha dakhli ama kharaj ay ummaddu leedahay.
Hanti-dhowrku wuxuu baarayaa diiwaannada,buugaagta,dokumeentiga,xisaabaadka,khasnadda,tikiddada,bakhaarrada iwm oo hanti dadweyne ama gaar ahaaneed ee lug yeesha arrimaha xisaabaadka Dowladda.
Hanti-dhowrku wuxuu awood u leeyahay in uu u yeero ama su'aalo weydiiyo qof kasta oo laga xaqiijinayo arrimaha la xiriira baarista,waqti iyo meel kasta.
Waxaa ku waajib ah Dowladda dhexe,Gobollada,Degmooyinka iyo hay'adaha kale ee u adeega Bulshada iwm inayan gelin kharaj aan ka diiwaan gashanayn Hanti-dhowrka Guud,sidoo kale la ma geli karo qandaraas aan laga diiwaan gelin Hant-dhowrka Guud.
Hanti-dhowrku,iasagoo gudanaya waajibkiisa,haddii uu u baahdo wuxuu daban karaa kaalmo iyo gacansiin uu ka helo ciidanka Booliska.
Dhammaan hay'adaha Dowladda Puntland,hay'adaha aan dowliga ahayn,Gobollada,Degmooyinka iyo shirkadaha waxaa waajib ku ah inay hawlaha hanti-dhowrka gacan siiyaan.

**Garyaqaanka Guud ee Dowladda:**
Waa agaasin Guud oo hoos yimaada Madaxtooyada,una xil saran:
Talo-bixinta ku saabsan sharciga iyo qawaaniinta marka ay soo weydiistaan hay'adaha ioyo laamaha Dowladdu.
Isku dubarididda xeer-sharci oo loo gudbinayo Golaha Wakiilada ama Golaha Xukuumadda.
Kaydinta nuqullada asalka ah ee asharciyada iyo xeerarka ka soo dhammaada hay'adaha xeer-dejinta.
Faafinta iyo ku soo saaridda faafinta rasmiga ah sharciyada iyo xeerarka cusub.
Difaaca danaha Dowladda,hay'adaheeda iyo laamaheeda Maxkamadaha Idaariga ah iyo kuwa madaniga ah hortooda.
Fulinta hawlihii kale ee uu sharcigu u xil saaro.

**Hay'adda Arr.Beni'aadannimada iyo Maaraynta Masiibooyinka Dabiiciga ah (HADMA).**

Hay'adda Arrimaha Beni'aadannimada iyo Maaraynta Masiibooyinka Dabiiciga ah waa hay'ad maamul ahaan madax-bannaan oo hoos timaadda Madaxtooyada.

Hay'addu waxay u xil saran tahay:

La socodka xaaladaha masiibooyinka,sida abaaraha,duufaannada,dhul-gariirka,bad-gariirka,daadadka,cudurrada faafa iwm.

Ka hot-tagga iyo qorshe-u-dejinta waxyeelada ay masiibooyinka dabiiciga ah iyo kuwa aan dabiiciga ahayniba geystaan.

Isku dubarinta iyo midaynta barnaamijyada,mashaariicda iyo hawl-gallada ku saabsan taakulada dadka iyo degaamada waxyeelooba.

Xiriirinta deeq-bixiyayaasha,hay'adaha iyo ururrada caalamiga ah,kuwa waddaniga ah iyo laamaha kala duwan ee dowladda kuna aaddan hawlaha gurmadka deg-degga ah,dib-u-dhiska iyo horumarinta degaamada ay waxyeeladu ka soo gaarto masiibooyinka.

Diyaarinta daraasadaha iyo warbixinnada la xiriira hawlaha hay'adda.

U soo gudbinta dowladda warbixinnada iyo talooyinka la xiriira xaaladaha taagan ama soo gudboonaan kara iyo digniinaha.

**Hay'adda Nabad-sugidda Puntland**

Hay'adda Nabad-sugidda Puntland waxay u xil saran tahay arrimaha nabad-sugidda.

Waxay warbixin hawlaheeda la xiriira u gudbisaa laamaha kala duwan ee dowladda.

Waxay wada-shaqayn iyo iskaashi la yeelanaysaa hay'adaha kale ee hawlaheeda saameeya.

**Qodobka 21aadQawaaniin kale:**

Wixii aan sharcigani qeexin oo la xiriira nidaamka Xukuumadda oo aan ka hor imaanayn Dastuurka Puntland waxaa loogu dhaqmayaa sida ku tilmaaman qawaaniinta kala ah:

Sharci lam.14 soona baxay 03/06/1962